Qaliinka: Lambektomi iyo Mastektomi
“Surgery: Lumpectomy and Mastectomy”

Dhamaan haweenka leh kansarka naaska waxaa lagu dhaqmaa **qaliin.** Qaliin looga saaraayo kansarka ugu badan oo suurtagalka ah. Nooca qaliinka waxay ku xiran tahay xaaladaha kala nooca ah, sida cabirka burada ama inta ay ku faaftay burada ama inta aysan ku faafin. Ga’aanka qalitaanka waxay kaloo ku xiran tahay ogolaashaha adig iyo dhakhtarkaada. Waa mid caadi ah in bukaan-socodka oo raadsado fikrad dhakhtar kale ka hor qalitaanka.

Waxaana jira erayo kala duwan oo loo isticmaalo qeexitaanka noocyada qaliinka, laakiin, run ahaantee, waxaa jira labo nooc oo waa-weyn:

- **Lambektomi** waa qaliin looga saaraayo kuuska burada iyo qaar ka mid ah unugyada kansarka ku wareegsan. Naaska oo dhan lagama saaraayo. Lambektomi inta badan ma badalo jirka muqaalka naaska. Lambektomi mararka qaarkood waxaa lagu magacaabaa "qaliinka naaska badbaadiyo".



Image Source: National Cancer Institute; Donald Gates, Artist

- **Mastektomi** waa qaliin looga saaraayo dhamaan naaska. Naaska inta badan dib ayaa loo dhisaa ka dib mastektomi, haddii bukaan-socodka oo doorto.



Image Source: National Cancer Institute; Donald Gates, Artist

Xiliga Lambektomi ama mastektomi, xirmooyinka xididada waa laga saari karaa iyadoo loo gooynaayo si kala soocan. Ka dibna la qalo, noocyada kale daaweynta sida daaweynta dabiiciga hormoonka (hormone) ama kimotarabiya (chemotherapy) waxaa loo isticmaali karaa ka hortaga ku faafida kanasarka jirka.

Kansarka weyn ama kansarka faafay waxaa lagu daaweyn karaa mastektomi. Mararka qaarkood, Kansarka weyn waxaa lagu daaweyn karaa lambektomi haddii kimotarabiyaha oo yareeyo kansarka ka hor qaliinka. Kansarka naaska oo yar (afar santiimitir ama ka yar) waxaa lagu daaweyn karaa in lagu guulaysto labada mid ah mastektomi ama lambektomi laguna daro raadiyeeshan.

Waxaa jira labo nooc qaliin ah oo leh khasaaro iyo faa'iido. Tusaale, lambektomi waxaa loo malayaa in aad badbaadiso muqaalka jirka naaska laakiin waxaa loo baahan yahay in maalin kasto, lix ilaa todobo todobaad lagugu daaweyo raadiyeeshan lagana bilaawo bisha qaliinka ka dib. Mastektomi waxay yareeyneesaa kansarka naaska in oo dib ugu soo laabto isla naaskii, laakiin bukaan-socodka wuxuu dooranayaa in naaska dib loo dhiso ka dib naaska la saaray.

Bukaan-socodka leh kanasar naaska oo yar wuxuu ikhtiyaar u leeyahay lambektomi laakiin wuxuu weli dooran karaa mastektomi sababo shaqsiyaad ah. Dhakhtarkaada ayaa kala falanqoon kartaa ikhtiyaarada, horay ama ka dib qaliinka labada nooc. Qaar ka mid ah haweeynka, naaskooda waa mid aad ugu muhiimsan. Qaar ka mid ah haweeynka, naaskooda muhiim uma aha iyadoo ay fiirinayaan xaalado kale, sida diidmada waqtiga iyo waxyeelaynta ay keeni karto raadiyashanka, iyo khasaaro yar in kansarka ku soo laaban karo qaybaha haray naaska.

Ka dib mararka qaarkood lambektomi, dhakhtarka wuxuu talo ku bixiyaa qaliin fara badan oo loo yaqaan "re-excision". Qaliinkaan waxaa gadaal laga gooyaa goobaha halka aad ku laheed lambektomi, waxaana laga qaadayaa oo laga goonayaa hilibka ku wareegsan burada. Dhakhtarka qaliinka ayaana sameeynaayo haddii unuga kansarka laga helo gees u dhaw halkii hilibka laga saaray xiliga qaliinka koowaad. Waxaana aad u muhiim ah in laga saaro goobta in ay noqoto hal ka madax-banaan kansarka ku wareegsanaay asalka burada, waa in la hubiyaa in kansarka oo dhan ka dhamaaday. Waxaa laga yaabaa in aad maqashay dhakhtarka qaliinkaada in oo u tixraaco sidaan oo kale "sifeeynta dhinacyada." Tani waa qaab caadi ah.

Haddii isku dayida sifeeynta dhinacyada koowaad lagu guulaysan waayo, dhakhtaryaasha waxay isku dayayaan hal ama labo jeer in ka badan. Haddii aysan heli Karin in ay helaano sifaynta dhinacyada, ka dibna mastektomi ayaa looga baahan yahay. Mararka qaarkood way adag tahay sida loo maamula faafinta kansarka naaska, iyo mastektomi waxaa loo malayaa ikhtiyaarka kaliyah in aad isku daydo in laga saaro dhamaan cudurada.

Lambektomi, bukaan-socodka wuxuu qaadanayaa daawooyinka ka yareeynaayo xanuunka iyo wal-walka. Goobta naaska waxba ma dareeymeeyso, laakiin bukaan-socodka wuu soo jeedaa, waxaana la siinayaa daawooyin dajiyo ama waxaa la siinayaa daawada hurdada si oo waxba u dareeymin xiliga qaliinka. Dhakhtarka qaliinka wuxuu jeexayaa meel yar oo u dhaw burada naaska, wuxuuna ka goonayaa dibadana u soo saarayaa nawaaxiga ku wareegsan buruqda kuusan ee naaska. Bukaan-socodaka lagu sameeyo lambektomi wuxuu joogayaa hosbitaalka hal ilaa labo maalmood.

Waxyeelaynta caadiga ah ka dib lambektomi waxay yihiin naaska oo barar waqti go'an, naas jilicsan, naaska oo ka adkaada goobta la qalay, iyo dhacaano gala goobta nabarka. Waxyeelaynta caadiga ah ka dib raadiyeeshanka waxaa isku arkaysaa daal, maqaaka oo ku gudoota ama goobta qaliinka oo ku gudootata. Dhamaan waxyeelaynta waa waqti xadidan. Haweeynka intooda badan howlahoooda caadiga ah waxay u soo laabtaan labo todobaad gudahooda. Reesashada iyo qobka ka sameeysman goobta qaliinka waxay ku dhamaanayaan bilooyin, saas darted, muuqaalka ugu dambeeyo ee aragtida naaska waqti ayey u baahan tahay.

Mastektomi, bukaan-socodka waxaa la siinayaa daawooyin oo ku hurdo xiliga qaliinka. Mastektomi leh xirmooyinka kuus-kuuska carjawda banaanka ayaa loo soo saarayaa waxayna qaadaneysaa ugu dambeeyninta u dhaxeeyso 2-3 saacad. Bukaan-socodka waxaa la fiirinayaa dhaqsashada xawaaraha wadnaha iyo awooda dhiiga xiliga qaliinka. Dhakhtarka qaliinka wuxuu dilaacinayaa goobta kore oo u dhaw xudduda naaska nawaaxiga burada leh. Maqaarka intiisa badan waa laga tagayaa. Inta badan naaska ibtiisa lagama saaro, laakiin xididada caanaha u keeno naaska ibtiisa waa la jarayaa. Maqaarka hilibka ka hooseeyo si tartiib ah ayaa loo jarayaa waana laga saarayaa. Goobta la qalay waxaa la dhigayaa balaastik ama caag tuubo ah oo dhacaanka dhiiga looga soo qaadaayo xiliga reesashada nabarka. Tubada waxaa laga saarayaa labo todobaad gudahooda. Maqaarka si tartiib ah ayaa layskugu dhajinayaa dun ama bir-biino ah, ka dibna waxaa laga furayaa todobaad gudihiisa inta badan. Goobta la qalay waxaa lagu daboolayaa faashad. Goobta marka ay reesato waxaa ku arkaysaa xariijin xagtin ah. Bukaanka-socodka mastektomi wuxuu hosbitaalka joogayaa hal ilaa sedex maalmood, mararka qaarkood way ka badan kartaa. Bukaan-socodka wuxuu joogayaa hosbitaalka hal todobaad goorta ay jirto kaliyah arimo aday oo u baahan in jirka qaar ka mid ah la soo gooyo si loogu talaalo dhismaha naaska.

Waxyeelaynta caadiga ah ka dib Mastektomi dhiig in oo galo nabarka, malax ama qooyaan oo galo nabarka, waqti ku sii meel gaar ah oo dhaq-dhaqaajin weydo gacanta/ garabka. Goobti naaska waxba ka dareeymeeynin. Ka dib mastektomi, haweeyn badan waxay waayo-aragnimo ku dareemeeyn xanuun halkii naaska oo ahaan jiray, inkastoo naaska halkaa ku yaalin. Bukaan-socodka waa in oo sheegaa dhakhtarka goorta oo dareeymaayo xanuunka si loo siiyo daawada xanuun joojiyaha.

Qaar ka mid ah haweeynka leh mastektomi waxaa loo malayaa in ay doortaan in naaska dib loo dhiso ama dib loo sameeyo. Waxaana jira qaabab fara badan oo loo sameeyo naas cusub. Waa in aad kala hadashaa dhakhtarkaada ka hor qaliinka ikhtiyaarkaada. Mararka qaarkood waxaa dhacda si dhaqsi ah ka dib qaliinka mastektomi in la sameeyo dhisida naaska. Mararka qaarkoodna waxay la sameeyaa muddo ka dib. Qaar ka mid ah bukaan-socodka waxay doortaan in naaska dib loogu dhiso, qaar kalane way diidaan in ay sameeyaan ama in la yareeyo naaska kale, ama ay helaan "barosteeysisi (prosthesis)". Barosteeysis waa foom qaab naaska u ek oo la sameey laguna ridaaayo rajabeeytada gaar ah kuna haboon qaabka naaska jirka haweeynka. Barosteeysis wuxuuna u ekaanayaa naaska kale.

Haddii xirmooyinka linfaha laga saaro guurta qaliinka, waxaa loo malayaa in aad wax ka dareemi weydo maqaarka gacanta korkeeda. Ka dib waqtiga qaliinka bukaan-socodka waa in oo nasiyaa gacanta kuna haysaa halka ka koreeyso wadnaha qadar saacado ah si looga hortago gacanta in ay bararto. Bukaan-socodka waa in oo xadidaa badan si looo daryeelo in oo ku dhicin dhaawac gacanta iyo goobta la qalay inta ay ka reesaneeyso.